



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASARAADDA QORSHEYNTA, MAALGASHIGA IYO HORUMARINTA DHAQAALAH
AGAASINKA ISTAATISTIKADA QARANKA



WarbixinBileedka
TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA
Octoobar 2019

Warbixin kooban

Dhamaan Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bisha Oktoobar 2019 ayaa noqday 116.25, marka la barbardhigo 116.07 ee bishii Sebteembar 2019.


Isbedelka labada bilood u dhexeeya, Oktoobar iyo Sebteembar 2019 ayaa hoos u dhacu gaaray 0.15% Marka labarardhigo sare u kacii bishii hore ee Sebteembar 2019 oo gaaray 0.57%. bisha Oktoobar, sare u kaca isbedel bille ee Qiimaha **Gaadiidka** lagu raaco ayaa gaaray (+2.11%). Sare ukaca ugu badan ayaa ka yimid shidaalka iyo saliida gawaarida oo gaaray (+9.01%) (**Jaantus 2**).

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay ee bisha Oktoobar 2019 ayaa muujinaya in dhammaan qeybaha TSB hoos u dhacay 4.15% ee heerka cabirka sicir bararka, Marka la barbardhigo 12 Bilood eebishii Sebteembar 2019 oo ahaa 5.17% .

Tusaha Sicirka Badeecadaha, Oktoobar 2019	
Tusaha bishan Oktoobar	116.25
Tusaha bishii hore Sebteembar	116.07
Tusaha sanadkii hore bishii Oktoobar (2018)	111.62
Isbedelka bilaha ah %	0.15%
Isbedelka Heerka Sicir bararka ee sanadlaha ah%	4.15%

Shaxda 1: Sicir Bararka, Tusaha Sicirka Badeecadaha; Oktoobar2019 (Dec 2014 = 100

Heerka Sicir Bararka Marka Loo eego TSB



Warbixin bileedka bisha Oktoobar 2019 ee kusaabsanTusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) iyo faahfaahinta xiliwaqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiya websitekaAgaasinka<http://www.dns.org.so>Twitter @DNS_MoPIED

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Oktoobar 2019

Heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Oktoobar 2019

Heerka sicir-bararka bisha **Oktoobar** 2019 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) ee 12kii bilood ee la soo dhaafay, **Oktoobar** 2018 ilaa **Oktoobar** 2019.

Dhammaan qaybaha **TSB** uu ka koobanyahay ayaa hoos u dhacay 4.15 boqolkiiba laba iyo tobankii bilood ee la soo dhaafay, Oktoobar 2018 – Oktoobar 2019, marka la barbardhigo isla laba iyo tobankii bilood ee la soo dhaafay, Sebteembar 2018 –Sebteembar 2019, ayaa ahaa 5.17%.

Dhammaan qeybaha TSB billaha ah ayaa hoos u dhacay 0.15% Bishii Oktoobar 2019, marka loo barbardhigo bishii hore ee Sebteembar 2019 oo sare u kacay 0.57%.

Sicir bararka qeybo ka mid ah Badeecadaha, Oktoobar 2019.

Sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada caadiga ah** iyo **guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** Cuntada lagu karsado ayaa ah kuwa ugu muhiimsan badeecadaha la isticmaalo oo dhan.


Cuntada iyo Cabitaanada caadiga ah ayaa qiimahooda billaha ah hoos u dhacay -0.02%, tan ayaa waxaa sababay qiima dhac ku yimid qeybo ka mid ah Cuntada. Natiijo ahaan, sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay 7.64% bishii Oktoobar 2019, halka sicirbararka sanadlaha ah ee Sebteembar 2019 uu ka ahaa 8.12%.

Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska cuntada lagu karsado ayaa ahaa 0.00%. Inkastoo Sicir bararka sanadlaha ah ee qaybtaan uu hoos u dhacay -5.39%, Oktoobar 2019. halka sicir bararka sanadlaha ee bishii Sebteembar 2019 uu ahaa -3.39%.

Dhammaan Qaybaha TSB iyo Qeybaha TSB

All Groups CPI and Selected Groups

Index = 100 @ December 2014




Source: Directorate of National Statistics

Warbixin bileedka bisha Oktoobar 2019 ee kusaabsan Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) iyo faahfaahinta xiliwaqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa websiteka Agaasinka <http://www.dns.org.so> Twitter @DNS_MoPIED

Qaybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadde ah (TSB)

B. Qeybaha ugu waaweyn ee isbedelka sanadlaha (TSB)

jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Oktoobar 2019 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee sicir bararku Kordhay (+):

- **Cuntada iyo cabitaanada** caadiga ah ayaa sicirkoodu kordhay 7.64% 12kii bilood ee Oktoobar 2019. Kororka sicirka ayaa ka dhashay sare ukac ku yimid sicirka Qudaarta. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid Qiimaha iyo Liin orange (+75.00%) iyo Liin Bambeelmo (+133.33%).
- **Dharka iyo Kabaha** ayaa sicirkooda sare u kacay 11.26% bishii Oktoobar 2019, marka la barbardhigo sare u kac sanadde ah oo gaaray 11.09% bishii Sebteembar 2019. Sicirbararka ayaa ka dhashay qiimaha dharka Caruurta oo gaaray (+15.45%) marka loo eegayo sare u kac ku yimid dharka.
- **Maqaayadaha iyo hoteelada** qiimaha looga cunteeyo ayaa sare u kacay 4.44% bishii Oktoobar 2019 marka la barbardhigo 2.39% bishii Sebteembar 2019, sare u kaca ugu weyn ayaa ahaa maqaayadaha, Kafeyga iyo wixii la mid ah, sare u kaca ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha Maqaayadaha looga cunteeyo oo gaaray (+4.58%).
- **Qiimaha Adeega Gaadiidka** ayaa muujiyey sare u kac Sanadde ah oo gaaraya 2.56% bisha Oktoobar 2019, marka loo barbardhigo 2.73% taas oo lagu diiwaangeliyey bishii Sebteembar 2019. inta badan sare u kaca ayaa ka yimid **kala iibsiga Gawaarida** oo gaaray (+11.84%).
- **Tubaakada** ayaa sare u kacday 11.88% bishii Oktoobar 2019. Taas ayaa kadhigeysa in qiimaha qaadka uu yahay mid Sabeynaya. Qiimaha Qaadka ayaa ah mid aalaaba sabeeya.


Qaybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay (-):

- **Madadaaladda, Hawo bedelehshada & dhaqanka** ayaa sameeyey hoos u dhac sanadde ah oo gaaraya -5.68% bishii Oktoobar 2019, marka loo barbardhigo hoos u dhac Sanadde ah -5.11% bishii Sebteembar 2019. Hoos u dhaca ayaa ka yimid *Agab Xafiiseed iyo Agabka wax lagu sawiro* (-7.56%).

- **Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska** cuntada lagu karsado, ayaa sameeyey hoos u dhac sanadle ah oo gaarayey -5.39% ee Oktoobar 2019. marka loo barbardhigo Sicir bararka sanadlaha ah ee qaybtaan uu hoos u dhicay -3.39% ee bishii Semtembar 2019, Hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha *qaybinta biyaha* oogaaray (-11.08%).

B. Heerka sicirbararka marka loo eego tusha sicirka badeecadaha

- **Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qaybaha; Oktoobar**
- **2019 (Dec 2014 =100)**



Qaybaha ugu weyn ee Sicir bararku ku kordhay bisha Sebtembar (+)

- **Qiimaha Adeega Gaadiidka** ayaa muujiyeysare u kac Sanadle ah oogaaraya 2.11% bisha Oktoobar 2019, marka loo barbardhigo -1.50% taas oo la diiwaangeliyey bishii Sebtembar 2019. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid howsha kaladaabulista Agabka shaqsiyaadka. Sare ukacaayaakayimid Shidaalka iyo saliidaha gaadidka oo gaaray (+9.01%).
- **Maqaayadaha iyo hoteelada** qiimaha looga cunteeyo ayaa sare u kacay ku dhawaad 2.01% bishii Oktoobar 2019 marka la babardhigo 1.26% bishii Semtembar 2019, sare u kaca ugu weyn ayaa ahaa maqaayadaha, Kafeyga iyo wixii la mid ah, sare u kaca ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha Maqaayadaha looga cunteeyo (+20.00%).

Qaybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Juulay 2019(-):

- **Tubaakada** ayaa hoos u dhacay -3.26% bishii Oktoobar 2019, halka lagu qabtay 1.61% Sebteembar 2019. Halka lagu qabtay 1.61% ee bishii Sebteembar 2019, Hoos u dhaca ayaa ka yimid qiimaha Qaadka oo gaaray (-3.33%). Taas ayaa ka dhigeysa in qiimaha qaadka uu yahay mid Sabeynaya. Qiimaha Qaadka ayaa ah mid aalaaba sabeeya.

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qaybaha badeecadaha Oktoobar 2019 ee habka COICOP (Dec 2014=100)

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Oktoobar 2018 Tusaha	Sebteembar 2019 Tusaha	Oktoobar 2019 Tusaha	% Isbedelka bishaan iyada bishiihore	% Isbedelka bishaanadkaan Iyobisha sanadkiihore
<i>Dhamaan qaybaha TSB</i>	100.00	111.62	116.07	116.25	0.15	4.15
Cuntada & Cabitaanada caadiga ah	46.04	115.85	124.73	124.70	-0.02	7.64
Tubaakooyinka	1.25	127.06	146.95	142.16	-3.26	11.88
Dharka & Kabaha	5.03	108.47	120.60	120.68	0.07	11.26
Guryaha, Biyaha, Korontada & Gaskacuntada lagukariyo	23.41	109.22	103.33	103.33	0.00	-5.39
Agabka Guryaha	2.93	105.08	102.71	102.71	0.01	-2.25
Caafimaadka	5.00	102.77	118.92	118.92	0.00	15.71
Gaadiidka	3.77	107.81	108.28	110.57	2.11	2.56
Isgaarsiinta	2.80	94.60	96.32	96.32	0.00	1.82
Hawo bedelehshada & dhaqanka	1.00	104.38	97.30	98.45	1.18	-5.68
Tacliinta	4.00	100.61	105.93	107.75	1.72	7.09
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	132.71	135.88	138.61	2.01	4.44
Alaabaha yaryar & Adeegyada	2.77	108.83	104.27	105.03	0.73	-3.49

Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa lasoo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bil kasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn ee ku kalayaala Magaalada Muqdisho.

Soosaarida tan xigta

Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Oktoobar 2019 waxaa la baahin doonaa 15th November 2019. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku u saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee Xafiiska Istaatistiskada, Faldan booqo Bogeena rasmiga ahee <http://www.dns.org.so>

Warbixin bileedka bisha Oktoobar 2019 ee kusaabsan Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) iyo faahfaahinta xiliwaqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa websitka Agaasinka <http://www.dns.org.so> Twitter @DNS_MoPIED


Lifaaqa 1aad: Dhammaan Qeybaha 'TBS' –kuwa kaqeybqaataysicir-bararka bishii Oktoobar 2019.

Dhammaan Qaybaha TSB

Xadigaqiimahakukordhay (%) (Kororka COICOP)

Dhammaan qaybaha TSB

Points contribution (%) to inflation rate (contribution by COICOP)



Source: Directorate of National Statistics

Warbixin bileedka bisha Oktoobar 2019 ee kusaabsan Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) iyo faahfaahinta xiliwaqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa websitaka Agaasinka <http://www.dns.org.so> Twitter @DNS_MoPIED